



## GAWAARIDA DADWEYNAHA EE LA KIRAYSTO

### WARSIDAHA #003

### ISBADALADA KU YIMID ACCESSIBLE TAXI INCENTIVE

2023 JANAAYO 30

Mar labaad waxaa mahadsan qof kasta oo ka qayb galay kulanka ka qayb qaadasahda ku saabsan WAV Calgary iyo Barnaamijka Accessible Taxi Incentive (ATIP). Shirkaddu waxay ahayd mid howl badan haysa, waxay bixisay jawaab celin waxtar leh, waxaana hoos ku qoran gunaanadkeeda:

- WAV Calgary ma ahan inay u shaqayso sidii shirkad tagaasi oo kale
- Waa inay jirtaa cadaalad, hufnaan, iyo sinaan u dhaxaysa dhammaan darawalada degelka WAV Calgary
- Darawalada qaarkood (ee kujira barta WAV Calgary) si toos ah waxay u helaan safaro 'wayn', xataa haddii aysan ahayn taksiga ugu dhow goobta qofka laga soo qaadayo
- Laymanka telefoonka WAV Calgary inta badan waa mashquul oo darawaladu ma awoodaan inay la xidhiidhaan qofka alaabta qaaday si ay u hubiyaan tafaasiisha safarka ama ay u codsadaan in la caawiyo
- Khariidada Google ee taableedka wakhtigeedu wuu dhacay
- Darawalada waa inay helaan lacagta taageerada ah safarkiiba wixi ah safarada "Koodhka 8" (loo soo marinayo dalaalkooda)
- Darawaladu waa in ay helaan taageerada safarkiiba ee safarada WAV ee uu tirtiray macmiilku oo 'aan soo baxayn'
- Beddel wakhtiga la qorsheeyay Subax/Galab saacadood ee lacagta taageerada ah safarkiiba (4 Subaxnimo – 6 Galabnimada iyo 6 Fiidnimo – 4 Subaxnimo)
- Darawaladu waa inay helaan lacagta taageerada ah ee bilaha ah safarkiiba, halkii ay ka heli lahaayeen saddexdii bilood
- Waa in maalgelin badan lagu sameeyo si wax looga qabto baabuurta gabowday, kharashyada kordhaya ee beddelka baabuurta, iyo kharashka kordhaya ee rakibaada sare u dalaca baabuurta cusub/kuwa ka cusub

#### Isbeddelada ATIP:

- Lacagta taageerada safarkiiba saacadahu waxaa loo beddeli doonaa ilaa 4 Subaxnimo – 4 Galabnimo iyo 4 Galabnimo – 4 Subaxnimo
- Lacagta taageerada ee safarkiiba waxaa loo soo saari doonaa bil kasta (safarada la dhammaystiray ee madasha WAV Calgary)

## Xiriirka Shirkadda Gawaarida la Kiraysto

- Lacagta taageerada safarkiiba waxay kordhi doontaa ilaa \$15 (4 Subaxnimo – 4 Galabnimo) IYO \$25 (4 Galabnimo – 4 Subaxnimo)
- Lacagta taageerada la heli karo ee darawalku waxay kordhin doontaa laga bilaabo \$2000 ilaaa \$4500
- Lacagta taageerada ee bilaydhka la gaadhi karo waxay ka kordhi doontaa \$3000 ilaa \$3500

Kooxda Kiraynta Baabuurta waxay sahaminayaan fursada in la bixiyo taageero dheeraad ah:

- Safarada 'Koodhka 8'
- Safarada macmiilku 'tirtiray' iyo kuwa 'aan soo baxayn'
- Kaalmada maaliyadeed ee rakibadaada sare

Magaaladu waxay ka qayb qaadanaysaa wakiilada WAV Calgary, sahaminta nidaamka cusboonaysiinta/dib u eegida xogta, iyo qiimaynta fursada taageerada cusub. Nooca la cusboonaysiiyay ee Qaab dhismeedka Taageerada Tagsiga La gaadhi karo waxaa la soo dhigaa Calgary.ca.

**Warsidahan waxaa lagu heli karaa Amxaari, Carabi, Hindi, Bunjaabi, Soomaali iyo Urduu [Calgary.ca](http://Calgary.ca).**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan Accessible Taxi Incentive Program, fadlan iimayl u dir [itsengagement@calgary.ca](mailto:itsengagement@calgary.ca).

Daacada kuu ahaa,



Ku simaha Ku xigeenta Sarkaalka sare, Madaxa Gawaarida Dad waynaha  
Maaraynta Gurmada & Badbaadada Bulshadda